# DUGSIGA SARE IDA B. WELLS
# AXDIGA KOOXDA LA-TALINTA NAQSHADEYNTA

**Ujeedada iyo Doorka Kooxda La-talinta Naqshadeynta**

Kooxda La-talinta Naqshadeynta (DAG) waxay kula talin doontaa Kooxda Mashruuca Casriyeynta Ida B. Wells inay horumariyaan naqshad dhammaystiran, siman, isku dhafan oo aragti u leh Dugsiga Sare Ida B. Wells oo la casriyeeyay iyada oo loo marayo ka-qaybgal bulsho oo dhab ah. Waxa ku jiri doona arday, waalidiin, macalimiin, ardaydii qalinjabisay, maamulayaal, shaqaalaha PPS, la-hawlgalayaasha, wakiilada bulshada iyo xubin guddiga dugsiga.

Tan waxaa lagu dhammayn doonaa hannaan fikir leh oo ay ka go'an tahay ka-qaybgalka bulshada Ida B. Wells dhexdeeda. Kooxda mashruuca ee degmadu waxay si toos ah ula shaqayn doonaan DAG si ay u hubiyaan in welwelkooda iyo rabitaankooda la fahmo lana tixgeliyo.

DAG waxay ururisaa oo isku keentaa talooyinka bulshada oo dhan waxayna iska kaashadaan faahfaahinta kobcinta mashruuca xubnaha kale ee bulshada Ida B. Wells. DAG waxa ay noqon doontaa qayb muhiim ah oo ka mid ah qorshaynta wajiyada badan iyo habka ka qaybgalka bulshada kaas oo ay ku jiraan shaqaalaha PPS, ardayda, iyo xubnaha bulshada oo dhamaantood ay hagaan kooxda naqshadaynta lataliye. Falanqaynta mashruuca waxaa ku jiri doona noocyo kala duwan oo dukumeenti hore ah, sharciyeynta dhismo, goobta, miisaaniyada iyo shuruudaha kuwaas oo ay tahay in loo isticmaalo qiimaynta xulashooyinka naqshadaynta.

*Iyadoo xubnaha DAG aan loo xil saarin inay go'aannada kama dambaysta ah gaaraan, taladooda ayaa muhiim u ah abuurista qorshe dhammaystiran oo bulshada oo dhan ay ku faani karto.*

OGOW: Barnaamijka Bond-ka 2020 kuma jiraan maalgelinta dhismaha ee Dugsiga Sare Ida B. Wells. Maalgelinta dhismuhu waxay u baahan doontaa inay ka timaaddo Maalgelinta Horumarinta Dugsiga ee PPS mustaqbalka.

Doorka xubnaha DAG iyo mas'uuliyadaha:

- Ka-qaybgalka shirarka si aad ugala taliso kooxda mashruuca welwelka bulshada dugsiga, arrimaha, yoolalka iyo rabitaanka.
- U hoggaansanaanta xeerka anshaxa ee DAG.
- U warbixi oo ka soo qaado jawaab celinta kooxaha iyo ururada ay xubnaha DAG matalaan.
- Ka tali xeelado isgaarsiineed oo wax ku ool ah si loo gaarsiyo bulshada dugsiga oo dhan habka mashruuca iyo dhacdooyinka ka-qaybgalka dadweynaha.

- Waxa laga yaabaa inuu kooxda mashruuca ka caawiyo shirar dadweyne oo furan.
    - Waxa laga yaabaa inuu ka caawiyo dhacdooyinka dhismaha-bilowga iyo furitaanka waaweyn.

**Xubinimada**

Xubnaha DAG waxaa laga filayaa inay shaqeeyaan ku dhawaad 12 bilood inta lagu jiro marxaladaha horumarinta naqshadeynta. Fursado dheeraad ah oo ka qaybqaadasho ayaa laga yaabaa in la helo inta lagu jiro wejiyada naqshadaynta ee xiga. Urur ama kooxda bulshada ayaa codsan kara fursad ay ku keenaan wakiil kale si uu uga qayb galo shirarka haddii xubinta la doortay aanu awoodin inuu ka qayb galo.

Shaqaalaha Degmadu waxay dooran doonaan xubnaha DAG iyaga oo u maraya habka codsiga furan. Codsadayaasha dheeraadka ah ayaa laga yaabaa in la doorto si loo xaqiijiyo matalaad buuxda oo dheelitiran oo bulshada dugsiga ah.

DAG waxay soo magacaabin doontaa **Gudoomiye** ama **Gudoomiyaal** si ay uga caawiyaan ajandaha kulanka DAG & dib u eegista bandhigga, qorshaynta shirarka iyo hab-maamuuska kulanka. *Shaqaalaha PPS iyo xubnaha Guddiga uma shaqayn karaan sidii Gudoomiye/Gudoomiyaal.*

DAG waa in ay ku jirtaa ugu yaraan hal xubin mid kasta oo ka mid ah kooxaha bulshada ee soo socda: waalidiinta dugsiga, waalidiinta xaafadda, ururada xaafadaha, ururada ganacsiga, hogaamiyayaasha barnaamijka dugsiga, la-hawlgalayaasha barnaamijka iman kara, ardayda, iyo macalimiinta, marka lagu daro wakiilka guddiga dugsiga.

Xubinta doonaysa in ay ka baxdo DAG waa in ay qoraal ku socodsiisaa maamulaha mashruuca ee degmada; iimayl waa la aqbali karaa.

Haddii xubintu uu ka qaybgeli waayo laba shir oo isku xiga oo DAG ah cudurdaar la'aan, ama haddii kale uu awoodi waayo inuu ka shaqeeyo DAG, maamulaha mashruuca ee degmadu wuxuu ku dhawaaqi karaa booska DAG inuu bannaan yahay oo uu magacaabo qof kale oo ku habboon DAG.

Urur ama kooxda bulshada ayaa codsan kara fursad ay ku keenaan wakiil kale si uu uga qayb galo shirarka haddii xubinta la doortay aanu awoodin inuu ka qayb galo.

**Kooxda Mashruuca**
Kooxda mashruucu waxay ka koobnaan doontaa naqshadeeyaasha, injineerada, qorshayaasha,

maareeyaha mashruuca Xafiiska Casriyeynta Dugsiga (OSM) iyo shaqaalaha PPS. Waxay bixin doonaan ajandayaal, bandhigyo iyo tixgelin goobta; kooxda mashruuca ayaa sidoo kale fududeyn doona doodaha, diiwaan gelinta talooyinka, horumarinta falanqaynta iyo fursadaha shirarka DAG iyo dhacdooyinka dadweynaha.

Maamulaha mashruuca OSM, oo ah qofka ugu muhiimsan ee degmada lagala xiriiro mashruuca, ayaa kormeeri doona shirarka DAG iyo dhacdooyinka ka qaybgalka dadweynaha. Dhammaan isgaarsiinta xubnaha DAG ee ka baxsan shirarka DAG waa in loo diraa maamulaha mashruuca PPS.

**Go'aamada Mashruuca**

Go'aan ka gaarista mashruucu waxay noqon doontaa mas'uuliyadda Xafiiska Casriyeynta Dugsiga iyadoo la kaashanaysa Hoggaanka kale ee Degmada sida loogu baahdo. ***Xubnaha DAG waxay qabtaan door la-talin oo keliya, mana aha wakiillada Degmada ee rasmiga ah***

**Jadwalka Kulanka DAG & Qaabka**

Ballanqaadyada la qiyaasay waxaa ka mid ah: Ka qayb galka shirarka caadiga ah (qiyaastii bille ah) inta lagu jiro gu'ga 2024 ilaa deyrta dambe ee 2024. Wakhtiga dhacdooyinkan waxa la waafajin doona jadwalka mashruuca iyo dhacdooyinka kale ee ka qaybgalka bulshada ee dugsiga iyo degmada.

Goobaha kulanka DAG waxay ka dhici doonaan Dugsiga Sare Ida B. Wells. Qolka gaarka ah ee shirarka waa Maktabada Dugsiga Sare Ida B. Wells ilaa aan loo baahnayn isbeddel.

Jadwalka buuxa ee Kulamada DAG ayaa laga heli karaa websaydka Casriyeynta Ida B. Wells.

Kulamada DAG waxay u furan yihiin dadweynaha waxayna siinayaan fursad ra'yiga dadweynaha dhammaadka shirarka; agabka kulanka iyo qoraalada kulanka waxa lagu soo dhejin doonaa onlaynka.

**Ra’yiga Dadweynaha ee Kulamada**

Fursadda ra'yiga dadweynaha ayaa la bixin doonaa dhammaadka kulan kasta. Ra'yiga dadweynuhu waxay ku koobnaan doonaan 10 daqiiqo oo ugu badnaan 3 daqiiqo qof kasta. Kuwa doonaya inay fikradahooda u gudbiyaan DAG waxay u baahan doonaan inay iska diiwaan galiyaan kulanka. Bixinta ra'yiga waxay u dhici doontaa siday u kala horreeyaan. Kaararka ra'yiga ayaa la bixin doonaa kulan kasta. Dadweynaha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay fikrado qoraal ama iimaylka ah u soo gudbiyaan DAG. Faallooyinka iimaylka ayaa loo diri karaa schoolmodernization@pps.net.



Dugsiyada Dadweynaha Portland waa bare iyo shaqo-bixiye fursad loo siman yahay.